


**Yaa go’aaminaya inuu canggaagu Iswiidhishka u dhigto luqad labaad ahaan?**

Waa maamulaha cidda go'aaminaysa in ilmahaaga Iswiidhishka loogu dhigo luqad labaad ahaan. Si uu maamuluhu go’aan sax ah u gaari karo wuxuu u baahanyahay in la qiimeeyo horuumarka luqadeed ii canugga. Qiimeyntaas waxaa sameeyay macallimiinta.

## Iswiidhishka ka luqad labaad ahaan

**Dugsiga hoose-dhexe waxaa ka jira laba maaddo oo Iswiidhish ah: Iswiidhish iyo Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah. Ardayda iskoolku ama waxay dhigtaan Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah (sva) ama Iswiidhishka (sv).**

Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ahi waa maaddo goonideeda ah oo leh manhajkeeda waxbarasho. Inta waqti ahaan la dhigto Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ahi waxay la mid tahay inta la dhigto Iswiidhishka.

*Laga soo qaatay qodobka 14 ee fasalka 5 ee xeerka iskoollada: Iswidhishka ka luqad labaad ahaanta ah*

*Dhigidda iswidhishka ka luqad labaad ahaanta waa in, haddii loo baahdo, loo qabanqaabiyaa*

*1. ardayda uu afkooda hooyo yahay af aan ahayn Iswiidhish*
*2. ardayda uu afkooda hooyo yahay Iswidhish ee ka yimid iskoollo kale oo dibadda ah, iyo*
*3. ardayda soo galootiga ah ee uu Iswiidhishku u yahay luqadda ugu muhiimsan ee ay hal waalid ku wada xiriiraan.*

*Maamulaha ayaa go'aaminaya in ardayga luqad labaad ahaan iswidhishka loogu dhigayo iyo in kale.s*

Grundskoleförvaltningen

Göteborgs Stad

# Iswiidhishka ka luqad labaad ahaan



**Waad salaamantihiin waaliddiintoy!**

Wuxuu iskoolku baaray aqoonta canuggaaga ee luqadda Iswiidhishka.

Maamulaha iyo macallimiintu waxay u arkaan in uu canuggaagu xaq u leeyahay in uu maaddada Iswiidhishka u dhigto luqad labaad ahaan.

Waraaqdan ayaad ka akhrisan kartaa wax dheeri ah oo ku aaddan sida uu u shaqaynayo.

goteborg.se

**Waa maxay sababta ay carruurta qaarkood ugu baahanyihiin in Iswiidishka luqad labaad ahaan loogu dhigo?**

In lala koro luqado badan waxay u fiicantahay siyaabo badan. Carruurta yaqaanna luqado badan waxay luqadaha u isticmaali karaan siyaabo kala duwan iyo waqtiyo kala duwan. Laga yaabee in ay carruurtu dad kala duwan kula hadlaan luqado kala duwan. Haddii uu qofku ku fiicanyahay afkiisa hooyo way fududaataa inta badan inuu Iswiidhishka barato.

Carruurta si fiican Iswiidhishka u yaqaan marka ay iskoolka billaabayaan, dhawaaq ahaan iyo naxwa ahaan labadaba, waxay dhigan doonaan maaddada Iswidhishka (sv).

Carruurta la korta luqado badan ma helaan had iyo jeer fursado la mid ah carruurta kale oo ay ku hormariyaan luqadda Iswiidishka  inta aysan billaabin iskoolka. Wuxuu ilmuhu u baahan karaa inuu horuumariyo naxwaha iyo kaydka erayada ee Iswiidhishka, sii uu aad ugu fiicnaado luqadda Iswiidhishka. Carruurtaasi waxay xaq u leeyihiin in ay Iswiidhishka u dhigtaan ka luqad labaad ahaan (Sva).

**Waa maxay sababta ay u wanaagsantahay in loo dhigo carruurta Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah?**

Aad bay muhiim u tahay in dhammaan ardaydu ay hormariyaan luqad Iswiidhish oo wanaagsan oo dhinacyo badan leh, xag hadal iyo xag qoraal labadaba. Waxay taas macneheedu tahay in ay siyaabo iyo xaalado kala duwan u adeegsan karaan luqadda Iswiidhishka. In Iswiidhishka af-hooyo ahaan loo barto iyo in luqad labaad ahaan loo barto waa laba shay oo kala duwan.

Qof kasta oo bartay af cusub wuu ogyahay in aysan taasi ku imaannin si ootomaatik ah. Way dhici kartaa in degdeg lagu barto luqadda maalinlaha ah iyo saaxiibbada lagula hadli karo. Laakiin in la barto af-iswiidhishka si uu qofku ula socon karo maaddooyinka iskoolka oo dhan, waxay qaadanaysaa waqti dheer. Markaa Iswiidhishka luqad labaad ahaanta ah ayaa canugga u fiican oo caawinaya. Macalimiinta dhiga Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah waxay si dheeri ah ugu fiicanyihiin in ay ardayda baraan hormarinta afkooda labaad.

**Sideed ku ogaateen inuu canuggeygu u baahanyahay Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah?**

Iskoolka waxay macallimiintu ku baarayaan horuumarka luqadeed ee canuggaaga. Waxaa jira qaabab kala duwan oo taas loo adeegsado.

**Farqiga u dhexeeya Iswiidhishka iyo Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah**

Farqi sidaas u weyn uma dhexeeyo manhajka waxbarashada ee Hay'adda iskoollada ee xagga Iswiidhishka iyo Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah. Waa casharrada meesha ay ka jirto kala duwanaashiyaha weyni, taas oo macnaheedu tahay in ardayda qaadata casharrada Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah ay aad xoogga u saaraan ku hadlidda iyo qorista Iswiidhishka. Qaladaadka luqadeed ee ay ardaydu sameeyaan waxay inta badan calaamado u yihiin inuu ardaygu ku socdo waddadii uu kula fiicnaan lahaa luqadda Iswiidhishka.

Marka uu arday isku dayayo inuu sheego wax adag, waxaa dhici karta in luqadda Iswiidhishka aysan si fiican ula socon. Waxaa la dhihi karaa in fikraduhu ay hadalka sii hor ordaan. Iswiidhishka luqad labaad ahaanta ah wuu tixgelinayaa macallinku taas, marka uu qiimayn sameynayo oo uu buundooyin saarayo shahaaddada.

**Ka warran shahaaddooyinka?**

Shahaaddada Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ahi waxay ku qiimo tahay shahaaddada Iswiidhishka, waxaana si la mid ah Iswiidhishka loogu dalban karaa dhammaan barnaamijyada dugsiga sare.

**Ilaa inteebuu ilmahaygu dhiganayaa Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah?**

Ilaa inta loo baahanyahay ayaa ilmaha loo dhigayaa Iswiidhishka ka luqad labaad ahaanta ah. Ardayda qaarkood waxay u baahdaan in Iswiidhishka luqad labaad ahaanta ah loo dhigo inta ay dhiganayaan dugsi hoose-dhexe oo dhan, qaar kalana muddo intaas ka gaaban. Macallimiinta ayaa qiimeyn ku sameynaya horuumarka luqadeed ilmihiinna.

Mar kasta oo uu jiro wadahalka horuumarka ardaygu ayey macallimiintu kaala hadlayaan horuumarka luqadeed iyo aqooneed ee ilmahaaga.

**Weydiiya macallimiinta ilmihiinna haddii aad u baahantihiin inaad wax dheeri ah ogaataan!**